



Shil

 Espen Stranger-Johannessen

 Aakanee

 Mohamed Abdirashid

 3

 Soomaali so



Carlos wuxuu raacay mooto. Si degdeg ah ayuu u kaxeenayaa.



Waddadu biyo ayay leedahay. Waddada waa lagu simbiriirixanayaa.



Waxa faraha ka baxay xakamaynta mootada
kadibna waa uu ka dhacay.



Carlos si xun ayuu u dhaawacmay.



Gabadh ayaa ugu wacday Ambalaas. "Shil baa dhacay, si degdeg ah u kaalaya!"



Ambalaastii si degdeg ah ayay u soo gaadhay.



Laba nin ayaa Carlos saaray bareelaha.



Waxay Carlos ku qaadeen Ambalaaska.



Ambalaasta ayaa u kaxaysay isbitaalka.



Kalkaaliye ayaa Carlos geeyey isbitaalka.




Way dawaynaysaa isaga.



Carlos lugta aad ayay u xanuunaysaa, wuuna ka walwalsan yahay.



Laba dhakhtar ayaa lugtiisa qaliin ku sameeyey.



Waalidkiis ayaa soo booqday. Waxayna waydiiyeen sidee ayuu shilku u dhacay.



Waxay u kaxeeyeen guriga. Carlos waxa uu isticmaalayey biraha lagu socdo.



LIDA Stories

lidastories.net

Shil

 Espen Stranger-Johannessen

 Aakanee

 Mohamed Abdirashid

